**Somali**

NHS

***Cancer Screening Programmes***

# Ka baaridda HPV haweenka yeesha natiijada baarista korka ilmagaleenka ee unugyada si yar ama meeldhexaad u xun (dyskaryosis)

Warbixinta haweenka loogu talagalay

## Waa maxay HPV?

HPV waxay tilmaamaysaa Human Papilloma Virus (Fayruska Barta caarada naaska u eeg ee Jirka ka soo baxda).

HPV waa jeermis aad u caadi ah oo ku dhaca korka ilmagaleenka.

Haweenka intooda ugu badan ayuu fayrusku mar uun noloshooda ku dhacaa. Ugu badnaan uma baahna in la daaweeyo jirka ayaa iskii u tuura.

Waxuu HPV leeyahay noocyo badan intooda ugu badanna waxyeello ma laha. Noocyada qaarkood ayaa cillad u geysan kara korka ilmagaleenka. Waxaa noocyadaas loo yaqaannaa noocyada HPV ee ‘halista badan’. Cilladaha korka ilmagaleenku waxay badi u tirtirmaan marka uu fayrusku baxo. Haweenka qaarkood fayrusku wuu ku raagaa haweenkaas ayaana halis dheeraad ah ugu jira in ay yeeshaan cilladaha korka ilmagaleenka (cervical abnormalities) (CIN) kuwaasoo daawayn u baahan kara.

## Sidee ayay dadku HPV u qaadaan?

HPV waa jeermis aad caadi ugu ah dadka weligood galmooday. Maadaama uusan fayrusku muujin wax calaamado ah waxaa markaa suurogal ah in:

- Qofku uu qabay jeermiska sanado badan isagoo ogaynba
- Lammaane uu qaaday jeermiska sanado badan ka hor oo uusan isaguna ogayna.

## Waa maxay sababta la ii baarayo?

Waxaa HPV laga baari doonaa qaybaha laga soo qaado haweenka marka ugu horraysa yeesha natiijo baaris oo muujinaysa unugyada si yar ama meeldhexaad u xun (dyskaryosis). HPV lagama baari doono haweenka u imanaya baaris lagu celinayo oo soo horraysa sababtoo ah cillad hore.

Haweenka yeesha unugyada si yar ama meeldhexaad u xun (dyskaryosis) waxay boqolkiiba 15 ilaa 20 uun ugu jiraan in ay yeeshaan cillad daran oo u baahan daawayn.

Baaritaanka HPV waa muhiim maxaa yeelay waxuu waxtar u leeyahay in la ogaado haweenka daawayn u baahan.

Daraasad hore loogu sameeyey qorshe tijaabo ah ee NHS ayaa muujisay in baaridda HPV fogayn karto baarista lagu celceliyo ee aan loo baahnayn, haddiina ay jirto cillad u baahan daawayn taas si dhakhso ah ayaa loo soo helayaa.

## Sidee baaritaanka loo sameeyaa?

Waxaa baaritaanka loo sameeyaa iyadoo la isticmaalayo qaybta unugyada ee la soo qaado goorta baaristaada si aanan loogu baahan in aad u soo laabanto baaritaan kale. Waxaa qaybaha lagu fiiriyaa shaybaar qoraal ayaana natiijadaada laguugu soo diri doonaa.

## Maxaa dhacaya haddii aan HPV qabo?

Haddii HPV laga helo qaybta lagaa soo qaado waxaa laguugu yeeri doonaa in aad marto baarista loo yaqaan colposcopy (waxaa la isticmaalayaa qalab lagu fiiriyo korka ilmagaleenka). Baarista colposcopy waa hab si adag loogu fiirin karo korka ilmagaleenka si loo eego haddii aad daawayn u baahan tahay. Haddii aad daawayn u baahato waxaa caadi ahaan lagugu arki doonaa kiliniig bukaan-socodku yimaaddaan taasoo ka dhigan in aadan u baahan doonin in aad habeenka fadhido. Haddii aad rabto warbixin dheeraad ah oo ku saabsan baarista colposcopy waxaad la hadli kartaa Takhtarkaaga Guud (GP), qofka qaybta kaa qaadaya ama kiliniigga caafimaadka ee xaafaddaada. Waxaad weliba akhrisan kartaa buugyarahayaga la yiraahdo

'Cervical Screening — The Colposcopy Examination' (Baarista Korka ilmagaleenka — Baarista Colposcopy).

## Halkeen ka heli karaa war dheeraad ah oo ku saabsan HPV?

Haddii aad rabto warbixin dheeraad ah oo ku saabsan baaridda HPV ama wax kaloo lagu soo hadal qaaday xaashidan warbixineed waxaad kala hadli kartaa kalkaaliyaha xafiiska takhtarkaaga, ama booqo bogga internetka ee Barnaamijyada Baarista Kansarka ee NHS (NHS Cancer Screening Programmes) oo ah www.cancerscreening.nhs.uk